**Maxamed X. Raabbi**

# Lafaguridda dhismaha gabayga "dacartuba..."

Dhismaha gabayga Qaasin ee {DACARTUBA …} ayaa uu ku saabsan yahay qoraalkani; waa na laba qaybood: Dibuhabayn iyo Lafagurid. Daato kasta marka la soo guursho, waxa laga ma maarmaan ah in la hubiyo in ay dhamaystiran tahay. Afar cilladood oo gabaygan qoraalkiisa ku jirey ayaa aan ka nadiifiyey: Waxa na ay kala yihiin: i) Astaamayn (punctuation) aan sugnayn, waa aan isku deyey hagaajinteed; ii) Higgaadin (spelling) qaldan, meelaha ay qaldan tahay waa aan saxay; iii) Koobid iyo fidin (contraction & expansion), ereyyadii qoraal ku habboon waa aan fidiyey, kuwii hadal ku hagaagsan na waa aan koobay; iyo iv) Dibuhabayn, laba meelood ayaa dibuhabaynta u baahatay: gabayga guud ahaantiisa iyo beyd kasta. Labada ba wax baa aan ka qabtay, tirada beydadka se ma beddelin.

Xantoobinta (jaan, meter) beydkii shan baa uu noqday: saddex hinjiska ah iyo laba hooriska ah. Aleenaynta (syllabification) se beydka ugu gaabani waa afar iyo toban; ka ugu dheeri na waa toddobo iyo toban. Qaafiyaddu (alliteration) waa laba: '**M**' iyo '**ee/e**' oo beydadku badi ku dhammaadaa. Ku luuqaynta (recitation) Qaasin ma lahayn luuq u gaar ah. Gabaygan humaaggiisu (profile) waa laba: mid tusaya faraqa aleennada iyo mid qeexaya midayntooda. Hawlaha lafaguridda: gabay oo dhammi waa iskaga mid dhinacyada xantoobinta, aleenaynta iyo humaagga. Qaafiyaddiisa iyo ku luuqayntiisu se gabaygan gaar baa ay u noqon karaan ama gabay oo dhan ba.

Sagaal iyo labaatanka beyd ee gabaygani ka kooban yahay, saddex beyd midkii ba waa 14 aleeni, Siddeed midkii ba waa 15. Afar iyo toban midkii ba waa 16. Afar na midkii ba waa 17. Labadiisa humaag na tiradan ayaa uu ku salaysan yahay. Ka hore waa faraqa u dhaxeeya aleennada. Ka kale na waa aleennada ay beydadku iskaga midka yihiin.

Suugaanta Af-soomaaliga, inta aan ka warqabo, ma aanan akhriyin qoraallo cilmiyeysan oo ay faafiyeen culimo afkeenna hooyo u dhashay laga bilaabo intii aan hogaaminayay waaxda Af-soomaaliga ee kulliyadda waxbarashada ee Lafoole ilaa maanta. Waxa se aan malaynayaa in ay jiraan culimo soomaaliyeed oo ku hawlan horumarinta Af-soomaaliga, laga na yaabo in ay websaydyada (websites) ku faafiyaan fikradahooda. Culimo shisheeye ihi se waa ay ku faafiyeen Afingiriisi iyo Afcarabi ba qoraallo cilmiyeysan oo badidood heer sare ah.

Cilmiyeynta Af-soomaaligu waa hawl inoo wada taalla, gaar ahaan kuweenna nasiibka u heley tababarro u gaar ah suugaanta. Abwaannimadu (talent) waa hibo ama awood gaar ah oo Eebbe addoonkiisa siiyey. Tayaynta abwaannimadu se waa mid ku timaadda hab cilmi ah oo la barto muddo dheer, ku na salaysan farsamooyin cilmiyeysan oo ka midhadhalintoodu ka soo abuurantay cilmiyeynta suugaanta. Cilmiyeyntaas oo la kawsatay rasmiyeynta waxbarashada markii ay waxqoriddu bilaabantay oo kumannaan sano laga joogo hadda. Rasmiyeynta waxbarashada ayaa waqtigaas u qaybisay luqadda af iyo suugaan. Waa na la adeegsadaa ilaa hadda.

Heerka waxbarasho ee maanta waa mid adeegsada marinno aqooneed, aragtiyo casri ah iyo farsamooyin cilmi ku salaysan. Middani na waxa ay qoraalkii caadi ahaa, maansadii, sheekadii iyo riwaayaddii ba ka soo qaadday sidii daato (data) ama saambal (sample) la lafagurayo. Kolkaas culimada ku hawlan afka iyo suugaantu ba, waxa ay gaadhsiiyeen heer fiican walaw ay jiraan meelo qabyo ah iyo kuwo hufid u baahani.

Qoraalkani waa laba qaybood: ta hore waxa ay ku saabsan tahay sida aan dib ugu habeeyey gabayga 'DACARTUBA ....', ta dambe se waa lafaguriddiisa.

## 1. Sida aan dib ugu habeeyey.

Marka daato kasta la urursado, waxa habboon in la hubiyo in ay dhammaystiran tahay iyo in kale. Ama in ay tahay sida ugu habboon ee ay ahaan lahayd. Waxa dhici karta in marka la soo werinayo ama guurinayo ay gefaf dhacaan. Haddii aan si kale u dhigo, gabayga 'DACARTUBA ...." ee aan kala soo baxay websaydka 'Somaliland Poets', ma u qoran yahay sida ugu dhow ee uu gabayaagii hal-abuuray





u tiriyey? Ma se u astaamaysan yahay (punctuated) sida ugu fiican ee macnihiisa iyo dhismihiisu ay tilmaan sugan uga bixinayaan ujeeddadii laga lahaa tirintiisa?

Kaabaha labaad ee 'DACARTUBA' waxa uu tusaale u yahay sida aan dib ugu habeeyey. Dibuhagaajintanu na, waxa ay noqotay afar nooc: i) *Astaamayn* (punctuation) ; ii) *Higgaadin* (spelling); iii) *Koobid iyo Fidin* (contraction & expansion) iyo iv) *Dibuhabayn* (re-arrangement).

*Astaamayn*, sida ku qeexan kaabaha kowaad, hakad keli ah ayaa ku jira (beydka 9d) sagaal iyo labaatanka (29ka) beyd ee gabaygu ka kooban yahay. Ka labaad ee dibuhabaynta se beyd wali ba waxa uu ku dhammaadaa astaan nooc kasta ha ahaato ee. Markii aan astaamaynayay na, waxa aan isku deyey in uu akhriste kastaa fahmi karo dhismaha iyo macnaha gabaygan. Beydadkiisi na waxa ay u qaybsameen toddoba labaalay iyo shan saddexlay.

Astaamaynta ka sokow, waxa ku qeexan kaabaha 2d meelo xarriijimo hoosta ku leh oo aan yarayn. Xarriijimahaas waxa ku duugan dhawr qalad oo aan saxay; waxa na ay kala yihiin: ii) Higgaadin; iii) Koobid iyo Fidin iyo iv) Dibuhabayn.

Walaw Af-soomaaliga afartan sano dugsiyada lagu baranayay, waxa weli qoraalkiisa ku badan higgaadin qaldan (eeg kaabaha 1d), sida, beydka 1d *dhsshaa* → *dhashaa*; beydka 5d *iyu* → *iyo* meelo kale oo badan. Waxa aan isku deyey in aan saxo dhammaan higgaadihii qaldan.

*Koobiddu* waa hawl hadal; inta badan gabayaaga soomaaliyeed kor ayaa uu ka tiriyaa gabaygiisa. Kolkaas waxa jira meelo fidsan gabaygan (eeg kaabaha 1d) oo aan soo koobay, sida, beydka 1d *dhashaa aad* → *dhashaad*'; beydka 20d '*maalinba is-roga e* → *maalinbays roga e*'; iyo beydka 27d '*macaan oo ay* → *macaanoy*.' Fidintu se waa arrin u gaar ah qoraalka. Meelaha aan isku koobay na, waa ay fidsan yihiin markii aan soo guuriyey gabaygan.

*Dibuhabayntu*, markan waa mid gaar ah, waxa na ay u qaybsan tahay laba nooc: mid hinjiska iyo hooriska u kala gudubta, sida, '*waa* ←' beydka 3d iyo 21d. Iyo mid aleennada u kala gudubta, sida, '*talan* | *taalliyaan*' beydka 6d iyo beydka 21d' *gelinkii* | *ba waa*'. Labada ba waxa aan isugu dheellitirayay *xantoobinta* iyo

*aleenaynta.* Dibuhabayntu waa sida ugu fiican ee daato u qormi karto inta aan la gudagelin lafaguriddeeda.

## 2. Lafaguridda Gabayga Qaasin ee‘ DACARTUBA ...’

Qaybtan waxa aan kaga faalloonayaa dhismaha gabayga, macnihiisu ha ii dambeeyo ee. Gabaygan dhismihiisa, afar dhinac ayaa aan ka eegayaa: *Xantoobin* (Jaan, meter, foot), *aleenayn* (allanayn, syllabification),*Qaafiyad*,(alliteration) *luuq* (Jiib, melody) iyo Humaag (profile).

*Xantoobintu* waa habka ay ereyyada weedhu u xantoobsamaan marka uu qof gabyayo sida, *hinjiska* (beydka qaybtiisa hore) ama *hooriska* (beydka qaybtiisa dambe). Kolkaas Qaasin (alla ha u naxariisto ee) gabaygiisan ’DACARTUBA ….’, waxa uu ka kooban yahay sagaal iyo labaatan beyd (29 beyd ama layn). Beydkii ba waxa uu u sii qaybsan yahay laba qaybood: hinjis (qaybta hore) iyo hooris (qaybta dambe). Hinjiska ayaa ka dheer hooriska oo waa saddex xantoobo. Hoorisku na waa ka gaaban yahay hinjiska oo waa laba. Sagaal iyo labaatanka beyd ba waa ay ka siman yihiin xantoobinta (jaanta).

Sumadaha “|,‖, iyo #” waxa ay qeexaan ama kala soocaan xantoobooyinka (|), hinjiska iyo hooriska (‖) iyo joogsiga (#). Sumaddani ‘|’ waxay qeexdaa jaanta; beydkii ba na saddex ayaa ku jira: laba u dhexeeya saddexda qaybood ee hinjiska iyo mid u dhaxaysa labada qaybood ee hooriska. Sumadda ‘‖’ waxa aan u adeegsaday laba fikradood: kala xadaynta hinjiska iyo hooriska iyo dhammaadka beydka astaan kasta ha yeesho ee. Sumaddani ‘#’ se waxa ay u taagan tahay joogsi. Marka laga eego xagga joogsiga, beydadka dhamaystiran ee gabaygani waa labaalay ama sadexlay. Faraqa ugu weyn ee dhismaha beydadku waa tirada aleennada.

*Aleenayntu* waa habka ay xubnaynta ereyadu u dhisan yihiin. Tusaale ahaan, ereyga ‘*hooris*’ waxa uu u qaybsan yahay laba aleen: *hoo-ris*; ‘*hinjis*’ na laba kale:*hin-jis*. Kolkaas ereyada aleen keli ah ka koobma Af-soomaaliga waa *afar* nooc:

i) Shaqal keli ah, sida, ‘i’ iyo ‘u’, tus.:‘*Cali ayaa i salaamay*’iyo ‘*Cali ayaa u yimid reerkoodii*’;

ii) Shibbane iyo shaqal, sida, ‘na, iyo ‘si’, tus.: ‘Hoorisku na waa gaaban yahay’ iyo ‘Ma si kale ayaa aad yeeshay?’;

iii) Shaqal iyo shibbane, sida, ‘ah’ iyo ‘in’, tus.: ‘qof keli ah ayaa jooga’ iyo ‘In yar i sii’;

iv) Shibbane, shaqal iyo shibbane labaad, sida, ‘mar’ iyo‘hab’, tus.: ‘Mar baa aan cali la hadlay’ iyo ‘Hab fiican baa uu hadalka u dhigay’.

Aleen kasta waxa *xuddin* ( laga ma maarmaan) u ah shaqal. Shaqallada aleen kasta ku jiraa, waxa ay noqon karaan kuwo gaagaaban, sida, ‘i iyo u’, ama kuwo dhaadheer, sida, ‘aa, iyo uu’, ama kuwo dhafan/lammaan, sida, ‘ai/ay; ei/ey iyo aw/ aw’.

Sagaal iyo labaatankan beyd ee gabayga ‘DACATURBA ….’ ka kooban yahay, waxa ay u qaybsamaan afar nooc:

i) Saddex beyd oo midkii ba yahay 14 aleen ( beydadka 14, 21, 29);

ii) Siddeed beyd oo midkii ba yahay 15 aleen (beydadka 6,9,11, 13, 16, 19, 2 4, 27);

iii) Afar iyo toban beyd oo midkii ba yahay 16 aleen (beydadka 1, 4, 7, 8, 15, 17, 18, 20, 23, 25, 26, 28); iyo

iv) Afar beyd oo midkii ba yahay 17 aleen (beydadka 5, 10, 12, 22)

Beydadka gabay kastaa waa isku *muddo* (duration) ama waa isku jaan. Marka ay aleenno kooban ama yar yihiin (14, 15), jaanta waa la jiidayaa ama raajinayaa. Haddii se ay fidsan ama badan yihiin (61, 17), jaanta waa la hurgufayaa ama dedejinayaa. Sidani waxa ay jaan keli ah iskaga dhigaysaa afarta nooc ee ay aleennada ‘DACARTUBA…’ u qaybsan yihiin.

***Qaafiyadda*** sharaxeedu waa uu fudud yahay. Gabaygan ‘DACARTUBA …’ qaafiyaddiisu waa xaraf ‘***m***’ oo aan *jiifiyey* (italised). Beydkii ba waxa waajib ah in ay ku jiraan laba ‘***m***’: mid hinjis qaybtiisa ayaa raacsan iyo mid na hooriska. Gabayaa kasta waxa u furan in uu qaafiyadda gabaygiisa ku saleeyo xaraf ka mid ah alifba’da Af-soomaaliga. Waxa se dhici karta in uu gabayga ku dhammeeyo alifba’da. Xarafka ay yar yihiin ereyada ay ku bilaabmaan, gabayaagu waa uu ku

tijaabiyaa abwaannimadiisa ama aqoontiisa Af-soomaaliga.

***Luuqayntu*** waa arrin ku sal leh miyuusiga ama muusiiqada, waa na laga dhaafi karaa gabayga oo ereyyada iyo xantoobinta ayaa lagu ekaan karaa sida waqtigan loo badan yahay. Waxa se ay soomaali badan og tahay in ay gabayaa badani adeegsadaan luuq iyaga u gaar ah, sida, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo Cabdullaahi Suldaan (Timacadde) inta aan ka warqabo walaw ay jirto mid guud oo ay badi ba adeegsadaan abwaannada aan lahayn luuq u gaar.

Dhismaha gabaygu waxa uu ku salaysan yahay muusiiqada (miyuusiga). Haddii aan si kale u dhigo, gabaygu waa shaandho muusiiqa ka samaysan oo weedho (luqad) lagu gufeeyey. Weedhahaas oo gabay kasta macne gaar ah siinaya. Middan na waxa marag u ah beydka saddexda jeer badi ba lagu celceliyo ee gabayga laga horraysiiyo:

(8) *Hoo-baa-la-yay hoo-baa-la-yay hoo-baa-la-yay hoobee.*(6)

Beydkan hinjiska iyo hoorisku ba waa laba xantoobo. Hinjisku waxa uu ka kooban yahay siddeed (8) aleen, hoorsiku se waa lix (6). Dhismahani na waa miisaanka saddexda beyd ee midkii ba ka kooban yahay afar iyo toban (14) aleen ee gabaygan ku jira. Gabay kasta na waa sidaas salkiisu oo jaanta jiidisteeda iyo dedejinteeda ayaa beyd kasta ba ku saleeya beydkan hordhaca ah ee saddexda jeer lagu celcesho.

***Hummaagu*** waa muuqaalka uu yeesho gabaygu marka tirada aleennada loo rogo *garaaf* (graph). Aleennada gabaygan 'DACARTUBA...' waxa ay u qaybsamaan afar nooc marka laga eego dhinaca tirada aleennadiisa (14, 15, 16 iyo 17). Labadan shaxan (Garaaf, graph) ee hoose (eeg1.2, 1.3)[44], kolkaas, waxa ay wakiil ka yihiin hummaagga (the profile) gabaygan. Ka hore (a) waa taagan yahay, waxa na uu ku salaysan yahay kala duwidda/faraqa tirada beydadka : sida ay u kala dheer yihiin . Ka dambe se (b) waa gudban yahay, waxa na uu ku saabsan yahay midaynta tirada beydadka: beydka ugu dheer waxa ku jira inta ku jirta ka ugu gaaban.

44 Tifaaftirayaashu, si guud ahaan ay isu waafajiyaan habqoraalka buugan, waxay doorbideen in ay wax yar ka beddelaan habqoraalka uu adeegsaday qoraha soo diyaariyay qoraalkan. Bedelaadaasina waxay ku saabsantahay, gaar ahaan, xarfaha uu qoraalkiisa u adeegsaday: *ai, ei, au* iyo *z*, oo lagu beddelay xarfahan: *ay, ey, aw* iyo *dh*, sida caadi ahaan, ilaa haatan, Af-soomaaliga loo qoro. Ciddii doonaysa waxii ku saabsan habqoraalka qoraha u gaarka ah oo faahfaahsan wuxuu ka heli karaa buuggiisa, oo raadraacìisu yahay: Maxamed X. Raabbi, 2009, Cerd, Djibouti.











Jiifku (x-axis) waa tirada aleennada (14→ 17) ee beyd waliba ka kooban yahay, ka ugu gaaban ilaa ka ugu dheer. Jooggu (y-axis) se waa tirada beydadka isku aleenno ah (1 → 14). Haddii aad u fiirsatid shaxankan, beydadka min lix iyo tobanka (16) aleen ah ayaa ugu tiro badan (dheer) oo afar iyo toban (14) beyd ayaa ah. Waxa na ugu gaaban (tiro yar) saddex beyd oo midkii ba afar iyo toban (14) aleen yahay. Siddeed beyd waa min shan iyo toban (15) aleen, afar beyd na waa min toddoba iyo toban (17) aleen.

➢ Kaabaha 1d (Sida uu gabaygu websaydhka ugu jirey)

## Dacartuba Marbay Malab Dhashaa.

| | |
|---|---|
| *Dacartuba mar bay malab dhsshaa* | *aad muudsataa dhabaqe* |
| *Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh* | *meel ku wada yaalle* |
| *Midigtayda iyo bidixdu* | *waa labs mataanoode* |
| *Midi waa martida soora iyo* | *maato daadihise* |
| *Midina waa mindiyo xiirayiyo* | *mur iyu deebaaqe* |
| *Masalooyin talantanlliyaan* | *maandhow leeyahaye* |
| *Nin majiiro keliyuun qabsaday* | *hay malaynnina e* |
| *Mar baan ahay muddeec camal san* | *oon maagista aqoone,* |
| *Marna macangag laayaan ahoo* | *miiggan baan ahaye* |
| *Mar baan ahay muftiga saahidnimo* | *mawlaca u galaye* |
| *Marna makhaawi waashoo xumaa* | *miista baan ahaye* |
| *Mar baan ahay murtiyo baanisaba* | *madaxda reeraaye* |
| *Ay weliba muuniyo dulqaad* | *igu majeertaane* |
| *Mama reer-magaal loofaaroon* | *muuqan baan ahaye* |
| *Mar baan ahay nin xaaraan maqdaca* | *marin jidiinkiiye* |
| *Marna tuug mu'diya baan ahoon* | *maal Rasuul bixinne* |
| *Mar baan ahay maqaan awliyada* | *maqaddin koodiiye* |
| *Marna mudanta shaydaanka iyo* | *maal jin baan ahaye* |
| *Miisaanna ima saari karo* | *nin i maleeyaaye* |
| *Waxaan ahay nin midabbaynayoo* | *maalinba is-roga e* |
| *Muuqaygu gelinkiiiba* | *waa muunad gooniyahe* |
| *Muslinka iyo gaaladA dirkaba* | *waan macne aqaane* |
| *Malaa'igta naartiyo jannadu* | *waygu murantaaye* |
| *Nin intasoo mahadhooyin* | *loo mooggan baan ahaye* |
| *Ninkiise maalmo badan soo jiree* | *madaxu boosaystsy* |
| *Ama inuun rag miisaami jirey halkii kuu macaan oo* | *wuu i maan garanneNin kastow ay muhato laabtaadu* |
| *Ama aadan madaddaaladeeda* | *igala maarmaynin* |
| *Iska soo mar waa kuu bannaan* | *marinkaad doontaaye* |





➢ Kaabaha 2d (Sida aan dib ugu habeeyey)

Dacartuba Marbay Malab Dhashaa.

➢

| | |
|---|---|
| *Dacartuba mar bay malab dhashaad* | *muudsataa dhabaqe;* |
| *Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh* | *meel ku wada yaalle.* |
| *Midigtayda iyo bidixdu waa* | *laba mataanoode;* |
| *Midi waa martida soora iyo* | *maato daadihise;* |
| *Midina waa mindiyo xiirayiyo* | *mur iyo deebaaqe.* |
| *Masalooyin talantaalliyaan* | *maandhow leeyahaye;* |
| *Nin majiiro keliyuun qabsaday* | *hay malaynina e.* |
| *Mar baan ahay muddeec camalsanoon* | *maagista aqoone;* |
| *Marna macangag laayaan ahoo* | *miiggan baan ahaye.* |
| *Mar baan ahay muftiga saahidnimo* | *mawlacaw galaye;* |
| *Marna makhaawi waashoo xumaa* | *miista baan ahaye.* |
| *Mar baan ahay murtiyo baanisaba* | *madaxda reeraaye;* |
| *Oy weliba muuniyo dulqaad* | *igu majeertaane;* |
| *Marna reer-magaal loofaroon* | *muuqan baan ahaye.* |
| *Mar baan ahay nin xaaraan maqdaca* | *marin jidiinkiiye;* |
| *Marna tuug mu'diya baan ahoon* | *maal Rasuul bixine.* |
| *Mar baan ahay maqaam awliyada* | *maqaddin koodiiye;* |
| *Marna mudanta shaydaanka iyo* | *maal jin baan ahaye;* |
| *Miisaanna ima saari karo* | *nin i maleeyaaye.* |
| *Waxaan ahay nin midabbaynayoo* | *maalinbays-roga e;* |
| *Muuqaygu gelinkiiiba waa* | *muunad gooniyahe.* |
| *Muslinka iyo gaalada dirkaba* | *waan macne aqaane;* |
| *Malaa'iigta naartiyo jannadu* | *waygu murantaaye.* |
| *Nin intasoo mahadhooyin loo* | *mooggan baan ahaye;* |
| *Ninkiise maalmo badan soo jiree* | *madaxu boosaystay;* |
| *Ama inuun rag miisaami jirey* | *wuu i maan garane.* |
| *Nin kastow halkii kuu macaanoy* | *muhato laabtaadu;* |
| *Ama aanad madadaaladeeda* | *igala maarmaynin;* |
| *Iska soo mar waa kuu bannaan* | *marinkaad doontaye.* |

- Kaabaha 3d. (Gabayga dhismihiisii oo daataysan ama daato ah).

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4 2 4 3 3<br>Dacartuba \| mar bay \| *m*alab dhashaad ‖ *m*uudsataa \| dhabaqe ‖ | 10 | 6 | 16 |
| 4 4 2 2 4<br>Waxaan ahay \| *m*acaan iyo \| qadhaadh ‖ *m*eel ku \| wada yaalle# | 10 | 6 | 16 |
| 4 2 4 2 4<br>*M*idigtayda \| iyo \| bidixdu waa ‖ laba \| *m*ataanoode‖ | 10 | 6 | 16 |
| 3 3 4 2 4<br>Midi waa \| *m*artida \| soora iyo ‖ *m*aato \| daadihise‖ | 10 | 6 | 16 |
| 4 3 4 3 3<br>Midina waa \| *m*indiyo \| xiirayiyo ‖ *m*ur iyo \| deebaaqe# | 11 | 6 | 17 |
| 4 2 3 2 4<br>*M*asalooyin \| talan \| taalliyaan ‖ *m*aandhow \| leeyahaye‖ | 9 | 6 | 15 |
| 4 3 3 3 3<br>Nin *m*ajiiro \| keliyuun \| qabsaday ‖ hay *m*alay \| nina e # | 10 | 6 | 16 |
| 4 2 4 3 3<br>Mar baan ahay \| *m*uddeec \| camalsanoon‖ *m*aagista \| aqoone‖ | 10 | 6 | 16 |
| 2 3 4 2 4<br>Marna \| *m*acangag \| laayaan ahoo ‖ *m*iiggan\| baan ahaye# | 9 | 6 | 15 |
| 4 3 4 3 3<br>Mar baan ahay \| *m*uftiga \| saahidnimo‖ *m*awlacaw \| galaye‖ | 11 | 6 | 17 |
| 2 3 4 2 4<br>Marna \| *m*akhaawi \| waashoo xumaa‖ *m*iista \| baan ahaye# | 9 | 6 | 15 |
| 4 3 4 3 3<br>Mar baan ahay \| *m*urtiyo \| baanisaba‖ *m*adaxda \| reeraaye‖ | 11 | 6 | 17 |





| | | | |
|---|---|---|---|
| 4 3 2 2 4<br>Oy weliba \| *m*uuniyo \| dulqaad ‖ igu \| *m*ajeertaane‖ | 9 | 6 | 15 |
| 2 3 3 3 3<br>Marna \| reer *m*agaal \| loofaaroon ‖ *m*uuqan baan \| ahaye# | 8 | 6 | 14 |
| 4 3 3 2 4<br>Mar baan ahay \| nin xaaraan \| *m*aqdaca‖*m*arin \| jidiinkiiye‖ | 10 | 6 | 16 |
| 3 3 3 3 3<br>Marna tuug \| *m*u'diya \| baan ahoon ‖*m*aal Rasuul\| bixinne# | 9 | 6 | 15 |
| 4 2 4 3 3<br>Mar baan ahay \| *m*aqaam \| awliyada ‖*m*aqaddin \| koodiiye‖ | 10 | 6 | 16 |
| 2 3 5 2 4<br>Marna \| *m*udanta \| shaydaanka iyo ‖ *m*aal jin \| baan ahaye‖ | 10 | 6 | 16 |
| 3 2 4 2 4<br>*M*iisaanna \| ima \| saari karo ‖nin i \| *m*aleeyaaye# | 9 | 6 | 15 |
| 4 2 4 3 3<br>Waxaan ahay \| nin *m*i\|-dabbaynayoo‖ *m*aalinbays \| roga e‖ | 10 | 6 | 16 |
| 3 3 2 2 4<br>*M*uuqaygu \| gelinkii \| ba waa ‖ *m*uunad \| gooniyahe# | 8 | 6 | 14 |
| 5 3 3 3 3<br>*M*uslinka iyo \| gaalada \| dirkaba ‖ waan *m*acne \| aqaane‖ | 11 | 6 | 17 |
| 4 3 3 2 4<br>*M*alaa'iigta \| naartiyo \| jannadu ‖ waygu \| *m*urantaaye# | 10 | 6 | 16 |
| 4 3 2 2 4<br>Nin intasoo \| *m*ahadhoo\| yin loo ‖ *m*ooggan \| baan ahaye‖ | 9 | 6 | 15 |
| 3 4 3 3 3<br>Ninkiise \| *m*aalmo badan \| soo jiree ‖ *m*adaxu \| boosaystay‖ | 10 | 6 | 16 |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | 4 4 2 3 3<br>Ama inuun \| rag *m*iisaami \| jirey ‖ wuu i *m*aan \| garanne# | 10 | 6 | 16 |
| | 3 2 4 3 3<br>Nin kastow \| halkii \| kuu *m*acaano#y ‖ *m*uhato \| laabtaadu‖ | 9 | 6 | 15 |
| | 4 2 4 3 3<br>Ama aanad \| *m*ada \| daaladeeda ‖ igala \| *m*aarmaynin‖ | 10 | 6 | 16 |
| | 4 2 2 3 3<br>Iska soo *m*ar \| waa kuu \| bannaan ‖ *m*arinkaad \| doontaaye# | 8 | 6 | 14 |

## Raadraac


- Adams, Stephen J. 1997, Poetic Design: an introduction to meters, verse forms and figures of speech, Broadview Press, Canada.
- Kennedy, X, J.& Gioia, Dana, 1998, An Inroduction to Poetry, Ninth Edition Longman, New York.